Oregon Health Authority

QAYBTA CAAFIMAADKA DADWEYNAHA

Su'aalaha Inta La Iska weydiiyo(FAQs) Bixiyaha Daryeelka Caafimaadka iyo Xeerka Tallaalka Shaqaalaha Daryeelka Caafimaadka

(La cusbooneysiiyay 09-19-2022)

Hoos waxaa ku yaala jawaabaha su'aalaha inta badan la isweydiiyo (Frequently Asked Questions, FAQ) ee ku saabsan Sharciga Maamulka Oregon (Oregon Administrative Rule, OAR) 333-019-1010, Shuruuda Tallaalka COVID-19 ee loogu talagalay Bixiyeyaasha Daryeelka Caafimaadka iyo Shaqaalaha Daryeelka Caafimaadka ee Goobaha Daryeelka Caafimaadka. Su'aalahaan Aalaaba La Isweydiiyo (Frequently Asked Questions, FAQ) ayaa mudda kadib la cusbooneysiiyaa.

*Su'aal cusub ama la cusbooneysiiyay

S: Miyuu sharcigu khuseeyaa dhakhaatiirta ilkaha iyo daryeelka ilkaha? Taasi kuma qorna qeexida goobta daryeelka caafimaadka.

Haa. Dhakhaatiirta ilkaha ee jooga xafiisyada ilkaha way ku khasban yihiin sharcigan. Dhakhaatiirta ilkaha waa bixiyeyaasha daryeelka caafimaadka iyo shaqaalaha daryeelka caafimaadka. Daryeelka ilkaha waxaa loo tixgeliyaa daryeelka caafimaadka jirka waxaana rugta dhakhtarka ilkaha loo tixgeliyaa inay tahay goobta daryeelka caafimaadka. Shaqaalaha daryeelka ilkaha ee ka shaqeynaya, wax ka baranaya, daraasad ka sameynaya, kaalmo ka bixinayo, indha-indhayn ka sameynayo, ama ka tabarucaya rugta caafimaadka ilkaha ee bixinaysa daryeel bukaan ee toos ah ama suurtagal tahay inay si toos ah ama si dadban ugu baylah noqdaan bukaanka ama agabyada cudurka faafin kara sidoo kale waxay ku khasban yihiin sharciga.

S*: Maxay ka dhigan tahay in si buuxda loo tallaalnaado?

In si buuxda u tallaalan tahay waxaa loola jeedaa inaad qaadatay labada garoojo ee tallaalka COVID-19 ama hal garoojo oo tallaalka halka garoojo ah ee COVID-19 ah iyo ugu yaraan 14 maalmood inay ka soo wareegatay tan iyo markii ugu dambaysay ee shakhsigu qaatay tallaalka COVID-19. Tallaalada labada-goroojo ah waa Pfizer, Novovax iyo Moderna iyo tallaalka halka-goroojo ah waa Johnson & Johnson. Intaa waxaa dheer, tallaal kasta oo ku jira Liiska Isticmaalka Degdega ah (EUL) ee Ururka Caafimaadka Adduunka (WHO) waa mid la aqbali karo sida ku cad sharciga. Haddii aad ka qaadatay tallaalkaaga meel ka baxsan Maraykanka, dib u eeg muqaalka jaantuska macluumaadkaan si aad u hesho wixii macluumaad dheeri ah oo ku saabsan tallaalada la aqbali karo.

S: Sharcigu ma khuseeyaa shaqaalaha dukaamada tafaariiqda ee leh farmashiyeyaasha sida Walgreens ama shaqaalaha farmashiyaha Bi-Mart?

Haa, keliya shaqaalaha farmashiyaha (oo ay ku jiraan shaqaalaha maamulka ee ka shaqeeya farmashiyaha) haddii ay ku hawlan yihiin daryeelka bukaanka oo toos ah ama ay suurtogal tahay inay si toos ah ama si dadban ugu baylah noqdaan bukaanka.

S: Waa kuwee maadooyinka lagu tiriyo inay yihiin shaqaalaha daryeelka caafimaadka?

Qeexida bixiyaha daryeelka caafimaadka waa mid si ula kac ah u ballaaran waxaana ka mid ah shaqsiyaadka, mushaarka qaataha iyo mushaar ma qaataha, ka shaqeynayo, wax ka baranayo, daraasad ka sameynayo, kaalmeynaayo, kormeerayo ama ka tabarucayo goobta daryeelka caafimaadka ee bixinayso daryeelka tooska ah ee bukaanka ama daryeelka degganaha ama laga filan karo inay si toos ah ama si dadban ugu bayla noqdaan bukaanada, dagganeyaasha, ama waxyaabaha cudurka laga qaado, oo ay ku jiraan laakin aan ku xaddinayn shaqsi walba oo u diiwaangashan guddiga sharciyeynta caafimaadka sida lagu qeexay ORS 676.160, daryeelayaasha aan shatiyeysneyn, iyo adeegyo kasta oo ah wadaadnimo, cunto, deegaan, dhar dhaqida, amniga, injineeriyada iyo maareynta xarumaha, maamulka, qoridda qaansheegta, ardayga iyo hawlwadeenada tabaruceyaasha ah.

S: Shaqaalaha xarunta caafimaadka ee dugsiga iyo kalkaaliyeyaasha caafimaadka ee dugsiga ee uu shaqaaleeyay dugsiga labaduba ma laga rabaa inay u hoggaansamaan sharciga?

Haa.

S*: Miyey shaqaalaha daryeelka caafimaadka ka shaqeeyaan gudaha xabsiga, jeelka, xarunta dhaqancelinta dhalinyarada ama xarunta lagu hayo dhalinyarada halkaas oo daryeelka caafimaadka sida caadiga ah loo bixiyo sida lagu daray sharcigan?

Haa.

Shakhsiyaadka ku jira xarumaha dhaqancelinta ee ay leedahay dawlada, degmada iyo magaalada ee ka shaqaynaya ama ka caawinaya goobta daryeelka caafimaadka ee ku yaalo gudaha xabsiga, jeelka, xarunta dhaqancelinta dhalinyarada ama xarunta dhalinyarada lagu haayo kuwaas oo suurtagal ay tahay inay si toos ah ama si dadban ugu baylah noqdaan bukaanka ama degganaha, ama walxaha laga qaado cudurka waa inay u hoggaansamaan sharciga. Haddii shaqsiyaadka KALIYA ay daryeel toos ah/dadban ka bixinayaan aaggaga xarunta dhaqancelinta ee aan hoos imaan doonin qeexida “goob daryeel caafimaad” sida lagu qeexay sharciga, markaas sharciga laguma dabaqi karo.

S: Haddii xabsiga daawo siiyo qof weyn oo xiran (Adult In Custody, AIC) oo ku jira qolka xabsiga, ama uu ku sameeyo baaritaanka qaadashada caafimaad ee gudaha qolka AIC, taasi ma ka dhigaysaa goobaha daryeelka caafimaadka ee xabsiyada kuwo hoos yimaada sharciga tallaalka ee bixiyaha daryeelka caafimaadka ee Maamulka Caafimaadka Oregon?

Maya. Qeexitaanka goobta daryeelka caafimaadku waa mid ballaaran, balse waxaa loogu talagalay in lagu dabaqo goobaha sida caadiga ah daryeelka caafimaad looga bixiyo, ama goobaha kumeelgaarka ah sida rugaha guurguura ama ambalaasyada. Balse halkan, qolka xabsiga wuxuu la mid yahay “deegaan” gaar ah marka deegaan gaar ah ma ahan goob daryeel caafimaad haddii aan loo haysan shati, diiwaangashaneyn ama loo sharciyeyn sida mid ka mid ah xarumaha ama guryaha hoos yimaada qeexidda goobta daryeelka caafimaadka.

S: Miyuu sharciga khuseeyaa bixiyayaasha daryeelka caafimaadka ee daryeelka ku bixiyo kaliya degaanada gaarka loo leeyahay (tusaale ahaan, doulas, gargaarada daryeelka caafimaadka ee guriga, dabiibiyeyaasha, shaqaalaha daryeelka caafimaadka guriga, shaqaalaha daryeelka guriga, shaqaalaha guriga ee daryeelka jiroolaha, shaqaalaha xannaanada dadka waaweyn, iwm.)?

Maya, sharciga ma khuseeyo bixiyayaasha daryeelka caafimaadka ee kaliya daryeelka ku bixiya goobaha la deggan yahay ee gaarka ah haddii bixiyayaasha daryeelka caafimaadka ay ku bixiyaan daryeel kaliya goobaha la deggan yahay ee gaarka ah, oo goobahaas la deggan yahay midkoodna aysan shatiyeysneyn, diiwaangashaneyn ama loo sharciyeyn hoy camal ama xarun lagu qeexay goob daryeel caafimaad oo ku jirta gudaha xeerka. Tusaale ahaan, shaqaalaha daryeelka guriga ee daryeelka ku bixiya dhisme dabaq ah ma khuseeyo sharcigaan. Si kastaba ha ahaatee, shaqaalaha daryeelka guriga ee daryeelka ku bixiya hoyga xannaanada dadka waaweyn ee shatiyeysan, ayaa laga rabaa inay u hoggaansamaan sharciga.

S: Haddii aan ahay xirfadle shatiyeysan, sida dhaqtarka qurxinta oo shatiyeysan, oo adeegyo ku siiyo macaamiisha goobaha daryeelka caafimaadka sida isbitaalada ama xarumaha daryeelka muddada dheer, miyay shuruudda tallaalka ee bixiyaha daryeelka caafimaadka iyo shaqaalaha daryeelka caafimaadka aniga la iigu dabaqi karaa?

Haa. Shaqsi kasta oo ka shaqeynaayo ama caawinayo goobta daryeelka caafimaadka ee suurtagal tahay inuu si toos ah ama si dadban ugu bayla noqda bukaanka ama degganaha, ama walxaha uu cudurka ku faafo, ayay tahay inuu u hogaansamo shuruudda tallaalka ee bixiyaha daryeelka caafimaadka iyo shaqaalaha daryeelka caafimaadka.

S*: Miyuu xeerku khuseeyaa shaqaalaha u shaqeeya 100% si fogaan-arag ah?

Maya, si kastaba ha noqotee, OHA waxay ku talinaysaa in shakhsiyaadka ay la jaanqaadaan dhammaan talooyinka tallaalka, oo ay ku jiraan kuwa xoojiyeyaasha. Bixiyaha daryeelka caafimaadka kaas oo si toos ah u bixinin daryeelka bukaanka ee fool-ka-foolka ah oo aan awood u lahayn inuu si toos ah ama si dadban ugu bayla noqdo bukaannada, degganeyaasha, ama walxaha uu cudurka ku faafa, kuma khasbana shuruudda tallaalka ee ku jirta OAR 333-019-1010. Si kastaba ha noqotee, haddii bixiyaha daryeelka caafimaadka mar kasta uu bixiyo daryeelka bukaanka ee fool-ka-foolka ah ama, ujeeddo shaqo awgeed, uu u joogo goob daryeel caafimaad halkaas oo ay suurtagal tahay inuu si toos ah ama si dadban ugu bayla noqdo bukaannada, degganeyaasha, ama waxyaabaha cudurka ku faafo, bixiyahaas waxaa looga baahan yahay inuu u hoggaansamo sharciga.

S: Haddii aan leeyahay loo-shaqeeyeyaal ama aan u tabaruco wax ka badan hal loo-shaqeeye, miyay tahay inaan bixiyo caddeynta tallaalka ama foomka codsiga ka-dhaafitaanka ee loo diro loo-shaqeeye kasta?

Haa.

S: Miyay bixiyayaasha ruqsada haysta EMS hoos imanayaan sharciga?

Bixiyayaasha EMS ay ruqsada siisay Maamulka Caafimaadka Oregon oo ka shaqeeya, ka waxbarta, wax ka daraseeya, ka caawiya, ka kormeera, iska xilqaama goobta daryeelka caafimaadka oo bixiya daryeelka tooska ee bukaanka iyo dadka ama kuwa leh ubayla noqoshada tooska ah ama dadban ee bukaanada, dadka, ama walxaha faafa, aya ku xiran shuruudaha sharciga tallaal bixiyaha daryeelka caafimaadka. Goobta daryeelka caafimaadka waxaa ka mid ah goob kasta oo daryeel caafimaad lagu bixiyo, waxaana ka mid noqon kara meesha bixiyaha EMS uu ku bixiyo daryeelka, sida ambalaasta.

S: Miyay Darawalada Gaadiidka Caafimaadka Aan Degdega ahayn (NEMT) ku khasban yihiin shuruudaha tallaalka bixiyaha daryeelka caafimaadka/shaqaalaha daryeelka caafimaadka ee Maamulka Caafimaadka Oregon (OHA)?

OHA waxay ku dhiirrigelinayaan dhammaan shaqsiyaadka inay istallaalaan si uusan ugu dhicin COVID-19. Waa habka ugu wanaagsan ee ay kaga ilaalin karaa naftooda iyo tan dadka ku xeeran inuu ku dhaco COVID-19. Si kastaba ha noqotee, imminka darawalada Gaadiidka Caafimaadka ee Aan Degdega Ahayn (NEMT) kuma khasbana sharciga tallaalka ee bixiyaha daryeelka caafimaadka. Darawalka gaadiidka NEMT ma ahan goob daryeel caafimaad sida lagu qeexay sharciga OHA, haddana iyadoo ay darawalada NEMT si toos ah ula falgalaan bukaannada, ma bixiyaan daryeel caafimaad.

S: Miyey dab-demiyayaasha hoos imanayaan sharciga?

Haddii uu dab-damiyaha ruqsad ka haysto Maamulka Caafimaadka Oregon inuu yahay bixiyaha adeegyada caafimaadka degdegga ah (EMSP), heer kastaba ha ahaadee, iyo haddii qayb muhiim ah oo ka mid ah shaqadiisa ay tahay ka jawaabidda xaaladaha degdegga ah ee caafimaadka iyo in daryeel caafimaad ku bixiyo goobta xaalada degdega ah ee caafimaad, markaas dab-demiyahaas wuxuu ku khasban yahay inuu u hogaansamo sharciga tallaalka ee bixiyaha daryeelka caafimaadka. Dab-demiyaashu ayaa si joogto ah uga jawaaba wicitaanada degdega ee caafimaadka ee 911 waana kuwa ugu horreeya ee yimaada goobta, ambalaaska kahor, oo waxay bixiyaan daryeel caafimaad. Goobaha ku meelgaarka ah kuwaas oo daryeelka caafimaad lagu bixiyo ayaa lagu daray qeexitaanka goobta daryeelka caafimaadka. Sidaa darted, EMSPs-ka la ruqsadeeyay waa bixiyeyaasha daryeelka caafimaadka ee ka shaqeeya goobta daryeelka caafimaadka iyo waa inay u hoggaansamaan sharciga.

S: Miyuu boolisku, kuawaas oo haysta tababar caafimaad, ama ay yihiin bixiyeyaal daryeel caafimaad oo ruqsad haystaan si waafaqsan sharciga?

Malaha maya. Maadaama sarkaalka booliiska uu yeelan karo tababar caafimaad, ama xitaa noqon karo bixiye daryeel caafimaad oo ruqsad haysta, waxay u badan tahay in aysan qayb muhiim ah ka ahayn shaqadooda inay daryeel caafimaad oo toos ah ama dadban ku bixiyaan goob daryeel caafimaad. Haddii sarkaal boolis ah uu hayo shaqo qeexayso inuu daryeel caafimaad siiyo shaqsiyaadka, markaa sharciga ayay u badan tahay inuu khuseeyo.

S: Sharcigu ma khuseeyaa dhakhaatiirta xoolaha ee ka shaqeeya rugaha caafimaadka xoolaha?

Maya. Sharciga wuxuu khuseeyaa bixiyeyaasha daryeelka caafimaadka iyo shaqaalaha ku sugan goobaha daryeelka caafimaadka. Rug kashaqeysa caafimaadka xoolaha ma ahan goob daryeel caafimaad sidaas darteedna sharcigu ma khuseeyo dhakhaatiirta xoolaha ee daryeelka ku bixiya goobaha daryeelka xoolaha.

S: Miyuu sharcigu khuseeyaa goobaha Naafada Korritaanka?

Xarumo badan oo shati ka haysta DHS ama xarumo la sharciyeeyay ayaa laga yaabaa inay hoos yimaadaan sharcigan. Haddii ay jiraan shaqsiyaad bixinaya daryeelka bukaanka ee tooska ah ama daryeelka deggane ama ay suurtogal tahay inay si toos ah/si dadban ugu bayla noqdaan bukaanka ama degganeyaasha, iyo xarunta shatiga ka haysata DHS ay tahay goob daryeel caafimaad lagu bixiyo, markaas waxay ku khasban tahay sharciga marka laga reebo haddii aan si gaar ah looga dhaafin macnaha goobta daryeelka caafimaadka.

S: Miyuu sharcigu khuseeyaa isu-duweyaasha daryeelka ama maareeyayaasha kiisaska?

Haddii isu-duwaha daryeelka ama maareeyaha kiiska uusan bixinin wax daryeel bukaan ah ama ay suuragal tahay inuu si toos ah ama si dadban ugu baylah noqdo bukaanka ama degganeyaasha, markaa maya. Tusaale ahaan, maareeyaha kiiska kaasoo keliya kula hadla bukaannada ama degganeyaasha telefoonka kana shaqeeya xafiis oo aan bixinin daryeel bukaan oo toos ah kuma khasbana shuruuddan sharciga ah. Si kastaba ha ahaatee, haddii uu isku-duwaha daryeelka ama maareeyaha kiiska mar kasta u daryeelo bukaan-socodka si fool-ka-fool ah ama, ujeeddooyin shaqeed awgood, uu joogo goob daryeel caafimaad halkaasoo ay suurtagal tahay inuu si toos ah ama si dadban ugu baylah noqdo bukaannada, degganeyaasha, ama waxyaabaha cudurka ku faafo, shaqsigaas waxaa looga baahan yahay inuu u hoggaansamo sharciga. Maamulka Caafimaadka Oregon wuxuu ku dhiiragelinayaa dhammaan bixiyeyaasha daryeelka caafimaadka iyo dhammaan dadka reer Oregon ee u-qalma inay is tallaalaan si naftooda iyo dadka kaleba u dhowraan.

S: Miyuu sharcigu khuseeyaa dhakhaatiirta cudurada luqadda, daaweeyayaasha baxnaaninta dhimirka iyo jirka iyo dhakhaatiirta maqalka?

Haa, haddii ay ka shaqeeyaan, wax ka bartaan, daraasad ka sameeyaan, kaalmo ka bixiyaan, kormeeraan, ama ka tabarucaan goob daryeel caafimaad oo bixisa daryeel bukaan oo toos ah ama ay suurtogal tahay inay si toos ah ama si dadban ugu baylah noqdaan bukaanka, haddii aysan ka shaqeyn goob ka reeban qeexitaanka goob

daryeel caafimaad, ama daryeel ku bixinayaan guri qofka u gaar ah oo guriguna uusan shatiyeysnayn, diiwaangashanayn, ama uusan lahayn shahaadada xarun ama hoy sida ku qeexan sharcigan.

S*: Shaqaalaha bixiya adeegyada WIC miyaa loo tixgeliyaa inay yihiin bixiyeyaasha daryeelka caafimaadka ama shaqaalaha daryeelka caafimaadka oo ka shaqeeya goob daryeel caafimaad?

Haa. Shaqaalaha WIC ee bixiya adeegyada macmiilka ee rugaha caafimaadka WIC waxay sameeyaan qiimayn caafimaad, baaritaan caafimaad, miisaamida macaamiisha, bixiyaan waxbarashada naasnuujinta iyo la-talinta waxayna bixiyaan adeegyo kale oo la xiriira daryeelka caafimaadka waxayna si toos ah ula falgalaan macaamiisha. Xeerka tallaalka bixiyaha daryeelka caafimaadka OHA wuxuu quseeyaa bixiyeyaasha daryeelka caafimaadka iyo shaqaalaha ka shaqeeya goobaha daryeelka caafimaadka, marka waxay quseeysaa shaqaalaha WIC ka shaqeeya goobahan.

S: Miyaa looga baahan yahay daabiibayaasha duugista inay tallaalnaadaan sida waafaqsan sharciga tallaalka ee bixiyaha daryeelka caafimaadka ee OHA?

Waxbay ku xirantahay. Haddii dabiibaha duugista uu ku khasban yahay sharciga tallaalka ee bixiyaha daryeelka caafimaadka ee OHA iyo haddii kalaba waxay ku xiran tahay halka uu ku qabtaan duugista. Qeexitaanka goobta daryeelka caafimaadka waa mid ballaaran, balse waxaa loogu talagalay in lagu dabaqo goobaha sida caadiga ah daryeelka caafimaad looga bixiyo, ama goobaha kumeelgaarka ah sida rugaha guurguura ama ambalaasyada. Qaar ka mid ah goobaha ay dabiibayaasha duugista ay ku sameeyaan duugista waxay u badan yihiin goobaha daryeelka caafimaadka, balse kuwa kale ma ahan. Tusaale ahaan, goobaha duugista ee ku dhex yaala gudaha goobaha kale ee daryeelka caafimaadka sida xafiiska dhakhtarka ama xafiiska toobinta jirka waa goobo daryeel caafimaad oo bixiyeyaasha iyo shaqaalaha way ku khasban yihiin sharciga. Qololka duugista ma ahan goobo daryeel caafimaad iyo aaggaga duugista ee ku dhex yaala qololka duugista kuma khasbana sharciga. Goobaha lagu sameeyo duugista ee aan ku oolin goobaha daryeelka caafimaadka ayaa laga yaabaa inay weli uga baahan yihiin shaqaalaha inay qaataan tallaalka COVID-19.

S: Shaqaalaha AAA (Wakaaladaha Deegaanka ee Waayeelka) ayaa si joogto ah oo waqtiyeysan ugu arka macaamiisha goobaha daryeelka caafimaadka sida isbitaalada, xarumaha daryeelka muddada dheer, iyo xarumaha dadka waaweyn iyo dadka waayeelka ah ee ku khasban sharciga tallaalida bixiyaha daryeelka caafimaadka ee Maamulka Caafimaadka Oregon?

Haa. Shaqaalaha AAA waxay hoos imaan doonaan qeexidda “bixiyeyaasha daryeelka caafimaadka iyo shaqaalaha daryeelka caafimaadka” sababtoo ah waxay wax u qabtaan oo ay caawiyaan degganeyaasha macaamiishooda ah, ee ku jira goob daryeel caafimaad waxayna xiriir toos ah la leeyihiin degganeyaashaas.

S: Miyay shaqaalaha AAA (Wakaaladaha Deegaanka ee Waayeelka) kuwaas oo kaliya ku qaabila macaamiisha xafiiska AAA ku khasban yihiin sharciga

tallaalida ee bixiyaha daryeelka caafimaadka ee Maamulka Caafimaadka Oregon?

Maamulka Caafimaadka Oregon (OHA) wuxuu ku dhiirrigelinayaa qof walba inuu is-tallaalo. Waa sida ugu wanaagsan ee dadku ay cudurka uga ilaalin karaan naftooda, macaamiishooda, iyo dadweynaha. Si kastaba ha noqotee, haddii uusan xafiiska AAA ku dhex yaalin goob daryeel caafimaad sida xarunta daryeelka caafimaadka, shaqaalaha AAA ee keliya ka shaqeeya xafiiska kuma khasbanaan doonaan sharciga tallaalka ee bixiyaha daryeelka caafimaadka ee OHA.

S: Miyuu sharcigan khuseeyaa bixiyeyaasha daryeelka caafimaadka iyo shaqaalaha daryeelka caafimaadka ee ka shaqeeya ama ku bixiya daryeelka xarumaha daryeelka caafimaadka ee ku yaala dhulalka qabaa'ilada?

Maya. Sharcigan ma khuseeyo goobaha daryeelka caafimaadka ee ku yaala dhulalka qabaa'ilada ama bixiyeyaasha daryeelka caafimaadka ama shaqaalaha daryeelka caafimaadka ee ka shaqeeya goobaha daryeelka caafimaadka. Maaddaama ay yihiin Qabaa'ilo madax-bannaan, dawladdu aqoonsan tahay waxay qaadan karaan sharciyo iyo shuruuddo u gaar ah.

S: Shaqaalaha amniga ee ka shaqeeya xarunta daryeelka caafimaadka ma daboolaa sharcigan?

Haa, haddii shaqaalahaas ku haboon yihiin gudaha qeexidda bixiyayaasha/shaqaalaha daryeelka caafimaadka oo ay ka shaqeynayaan goobta daryeelka caafimaadka meeshaas oo daryeelka lagu bixiyo, kadid sharciga wuxuu khuseeyaa shaqaalahaas. Bixiyayaasha daryeelka caafimaadka iyo shaqaalaha daryeelka caafimaadka waxaa loola jeedaa shaqsiyaadka, mushaarka qataha ama mushaar ma qataha, shaqeynayo, baranayo, daraasadeynayo, caawinayo, kormeerayo ama ku tabarucayo goobta daryeelka caafimaadka ee bixinayso daryeelka tooska ah ee bukaanka ama daryeelka degganaha ama laga filan karo inay si toos ah ama dadban ugu bayla noqdeen bukaanada, dagganeyaasha, ama waxyaabaha cudurka laga qaado.

S: Haddii diiwaankaa iiga baahan tahay inaan u galo goobta daryeelka caafimaadka si joogto ah, sida geynta warqadaha boostada ama keydinta mashiinada iibinta, ama aan ku leeyahay shaqo dhisme oo kumeelgaar ah xafiiska dhakhtarka ama isbitaalka, ama mararka qaarkood aan hagaajiyo qaboojiyeyaasha xarumaha caafimaadka, iyo maadaama aan dhex maro aag ay joogaan bukaano, macaamiil ama degganeyaal, miyaan ahay bixiye daryeel caafimaad ama shaqaale daryeel caafimaad oo ku khasban sharciga tallaalka ee Maamulka Caafimaadka Oregon?

Waxay u badan tahay maya balse Maamulka Caafimaadka Oregon (OHA) wuxuu ku dhiirrigelinayaa qof walba inuu iska tallaalo COVID-19. Shakhsiyaadka qabta shaqo aan la xiriirin bixinta daryeel caafimaad, laakiin mararka qaarkood wax geeya goobaha daryeelka caafimaadka looguma talagalin in lagu daro sharciga OHA. Sharcigan waxaa loogu talagalay in lagu dabaqo shakhsiyaadka sida mudeysan oo joogtada ah uga shaqeeya, wax uga barta, daraaseeya, caawiya, ilaaliya ama ka tabaruco goob daryeel caafimaad, oo dhab ahaanbixiya daryeelka tooska ah ee bukaanka ama degganaha, ama maadaama ay u dhow yihiin bukaanka ama degganeyaasha ama

agabka jeermiska leh, halis ugu jira inuu ku dhaco COVID-19. Haddii aadan hubin in sharciga tallaalku ku khuseeyo adiga iyo in kale, waa inaad u badataa dhinaca tallaalka. Shakhsiga mas'uulka ka ah goobta daryeelka caafimaadka waa inuu hubiyaa in qof walba, ha ahaado mid ku khasban shuruudda tallaalka ama ku khasbaneyn, inuu sameeyo taxadarrada kale COVID-19 sida xirashada afxirada tayada sare leh, kala-fogaanshaha jireed iyo gacmo dhaqashada joogtada ah.

S: Miyuu sharciga tallaalida shaqaalaha daryeelka caafimaadka khuseeyaa shaqaalaha ku meelgaarka ah?

Haa. Sharciga wuxuu khuseeyaa shaqsiyaadka, mushaarka qaata ama aan qaadan, shaqeynayo, baranayo, daraasadeynayo, caawinayo, kormeerayo ama ku tabarucayo goobta daryeelka caafimaadka ee bixinayso daryeelka tooska ah ee bukaanka ama daryeelka degganaha ama laga filan karo inay si toos ah ama dadban ugu baylah noqdeen bukaanada, dagganeyaasha, ama waxyaabaha cudurka laga qaado, oo ay ku jiraan laakin aan ku xaddinayn shaqsi walba oo u diiwaangashan guddiga sharciyeynta caafimaadka sida loogu qeexay ORS 676.160, daryeelayaasha aan shatiyeysneyn, iyo adeegyo kasta oo karaani, cunto, deegaan, dhar dhaqida, amniga, injineeriyada iyo maareynta xarumaha, maamulka, qoridda qaansheegta, ardayga iyo hawlwadeenada tabaruceyaasha ah.

S: Shaqaalaha Daryeelka Caafimaadka ee Dhaqanka ma ku khasban yihiin sharciga tallaalka ee shaqaalaha daryeelka caafimaadka oo ma laga rabaa inay is-tallaalaan?

Haa, haddii shaqaalaha daryeelka dhaqanka ay hoos yimaadaan qeexidda bixiyeyaasha daryeelka caafimaadka iyo shaqaalaha ka shaqeeya goobta daryeelka caafimaadka.

S: Waa maxay guddiga sharciyeynta caafimaadka sida lagu qeexay ORS 676.160?

Sharciga wuxuu dhahayaa in bixiyaha daryeelka caafimaadka uu ku jiro, laakin ku xadidneyn, shaqsiyaadka shatiga ka heysta guddiga sharciyeynta caafimaadka sida lagu qeexay ee ku cad ORS 676.160. Maxay yihiin gudiyadaas?

“Guddiga sharciyeynta xirfadlaha caafimaadka” waxaa loola jeedaa sida soo socota, marka shaqsi walba ee ka diiwaangashan mid ka mid ah guddiyadaan waa bixiyaha daryeelka caafimaadka sida waafaqsan sharciga:

(1) Guddiga Shatiyeynta Gobolka ee Barashada Luqadda-Hadalka iyo Maqalka;

(2) Guddiga Gobolka ee Shatiyeynta Dhakhaatiirta Lafdhabarta;

(3) Guddiga Gobolka ee Shaqaalaha Bulshada ee Shatiyeysan;

(4) Guddiga Oregon ee La-taliyayaasha Xirfadda Leh iyo Daaweeyeyaasha Shatiyeysan;

(5) Guddiga Ilkaha ee Oregon;

(6) Guddiga Daaweeyeyaasha Duugista ee Gobolka;

(7) Guddiga Qolka Meydka iyo Qabuuraha Gobolka;

(8) Guddiga Oregon ee Daawada Dabiiciga ah;

(9) Guddiga Kalkaalinta Gobolka Oregon;

(10) Guddiga Indhaha ee Oregon;

(11) Guddiga Farmashiga ee Gobolka;

(12) Guddiga Caafimaadka ee Oregon;

(13) Guddiga Shatiyeynta Baxnaaninta Dhimirka iyo Jirka;

(14) Guddiga Daaweynta Jirka ee Oregon;

(15) Guddiga Cilmi-nafsiga ee Oregon;

(16) Guddiga Raajada Caafimaadka;

(17) Guddiga Baaritaanka Caafimaadka Xoolaha ee Gobolka Oregon; iyo

(18) Maamulka Caafimaadka Oregon, illaa iyo xadka uu maamulku ruqsad siiyo bixiyayaasha adeegyada caafimaadka degdega ah.

S: Shaqaalaha dawladda ee ka shaqeeya xarumaha dawladdu maamusho ma laga rabaa inay is tallaalaan?

Guud ahaan, maya. Markay ahayd Abriil 1, 2022, Gubanatoore Brown ayaa qaaday shuruudaha shaqaalaha gobolka ee helida tallaalka. Si kastaba ha noqotee, shaqaalaha gobolka ee ah shaqaalaha daryeelka caafimaadka iyo shaqaalaha ka shaqeeya goobaha daryeelka caafimaadka ayaa ku khasban OAR 333-019-1010 (Shuruudaha Tallaalka COVID-19 ee loogu talagalay Bixiyeyaasha Daryeelka Caafimaadka iyo Shaqaalaha Daryeelka Caafimaadka ee ku yaala Goobaha Daryeelka Caafimaadka) waxaana looga baahan yahay inay helaan tallaalka, ama haystaan ka-dhaafitaan la ansixiyay.

S: Ka waran haddii shaqsigu uu bixin karo caddayn taariikheed qoran oo cudurka COVID-19 ah, taasi ma ku filan tahay in la buuxiyo shuruudda tallaalka?

Maya. Caddaynta taariikhda cudurka COVID-19 oo beddel u ah tallaalka ma oggola sharcigu.

S: Haddii bixiye shati haysta uu diido inuu u hoggaansamo, ma saamaynaysaa shatiga?

Waa macquul. Bixiyuhu waa inuu ka hubiyaa guddigiisa shatiyeynta, maadaama taasi ay sharciyeeyaan guddiyada shatiga ee shaqsiyeed.

S: Warbixin noocee ah ayaa loo baahan doonaa si loo hubiyo u hoggaansanaanta?

Looma baahna wargelinta iska socota ee OHA. Dukumiintiyada waa in la hayaa ugu yaraan laba sanno waana in la siiyaa Maamulka Caafimaadka Oregon marka la codsado.

S: Waa maxay noocyada caddaynta tallaalka ee la aqbali karo?

Dukumiintiyada ay bixiyeen qabaa'ilka, federaalka, gobolka ama dowladda hoose, ama bixiye daryeel caafimaad, kuwaas oo ay ku jiraan shaqsiga magaciisa, taariikhda dhalashada, nooca tallaalka COVID-19 ee la siiyey, taariikhda ama taariikhaha la siiyey, iyadoo ku xiran haddii ay tahay Tallaal hal-qiyaas ah ama laba-qiyaas ah, iyo magaca **ama** goobta bixiyaha daryeelka caafimaadka ama goobta tallaalka laga soo qaatay. Dukumiintiyada waxaa ku jiri karaan laakin kuma xadidno kaarka diiwaanka tallaalka COVID-19 ama nuqulka ama sawirka dhijitaalka ee kaarka diiwaanka tallaalka, ama warqadda laga daabacdo diiwaanka tallaalka Maamulka Caafimaadka Oregon.

S: Sidee OHA u dhaqangelin doontaa sharcigan?

OHA waxay ku soo rogi karaan ganaaxyo madani ah shaqaalaysiyeyaasha bixiyayaasha daryeelka caafimaadka ama shaqaalaha daryeelka caafimaadka, qandaraaslayaasha iyo dhinacyada mas'uulka ah ee ku xadgudba qodob walba oo sharciga ah, oo $500 maalintiiba ku xadgudubkiiba.

S: Miyay OHA ka filaysaa loo-shaqeeyayaasha inay tallaabo qaadaan haddii shaqaaluhu aan la tallaalin?

Haa, sababtoo ah waa sharci darro in shaqaalaysiyaha uu shaqaaleysiiyo, qandaraas la galo, ama aqbalo adeegyada tabarucaada ee bixiyeyaasha daryeelka caafimaadka ama shaqaalaha daryeelka caafimaadka kuwaas oo shaqaynaya, wax baranaya, wax ka daraseynaayo, caawinaya, kormeeraya ama ka tabarucaya goob daryeel caafimaad marka laga reebo haddii bixiyeyaasha daryeelka caafimaadka ama shaqaalaha daryeelka caafimaadka si buuxda ayaa looga tallaalay COVID-19 ama waxay haystaan ka-dhaafitaan caafimaad ama diin oo diiwaangashan.

S: Ilaa goormee ayay bixiyeyaasha daryeelka caafimaadka iyo shaqaalaha ay tahay in ay u hoggaansamaan sharciga?

Bixiyayaasha daryeelka caafimaadka iyo shaqaalaha daryeelka caafimaadka ayaa looga baahnaa inay helaan tallaalka ugu dambayn Oktoobar 18, 2021, si ay ugu hoggaansamaan sharciga. Bixiyaha daryeelka caafimaad ama qofka shaqaalaha daryeelka caafimaadka ayaa laga yaabaa inuusan ka shaqeynin, baran, daraasadeyn, ku caawin, kormeerin, ama ku tabarucin goobta daryeelka caafimaadka marka laga reebo haddii ay si buuxdo u tallaalan yihiin ama ay bixiyeen dokumintiga ka dhaafida caafimaadka ama diimeedka.

S: Haddii shaqaalahaygu u hoggaansami waayaan oo aan cayriyo, miyuu caymiskayga shaqo-la'aanta kordhayaa?

Tani ma ahan su'aal ay Maamulka Caafimaadka Oregon ka jawaabi karaan. Waa inaad kala xiriirtaa Waaxda Shaqada ee Oregon wixii macluumaad ah ee ku saabsan shaqo-la'aanta.

S: Haddii shaqaale loo cayriyo inuusan tallaaleyn, miyuu u-qalmaa caymiska shaqo la'aanta?

Tani ma ahan su'aal ay Maamulka Caafimaadka Oregon ka jawaabi karaan. Waa inaad kala xiriirtaa Waaxda Shaqada ee Oregon wixii macluumaad ah ee ku saabsan shaqo-la'aanta.

S: Marka la joogo jeelka ismaamulka, yaa ka mas'uul ah qorista diiwaanada, xabsiga ama ismaamulka?

Loo-shaqeeyayaasha, qandaraaslayaasha, iyo dhinacyada mas'uulka ah waa inay hayaan caddaynta tallaalka ama codsiga ka-dhaafitaanka ee laga helo bixiye kasta oo tallaalan.

S: Miyeey loo-shaqeeyayaashu mas'uul ka yihiin haddii aysan fulin shuruudda tallaalka oo shaqaaluhu la bukoodo COVID-19?

Loo-shaqeeyayaashu waa inay kala tashadaan la-taliyaashooda sharciyeed arrimaha mas'uuliyadda sharciyeed ah. Loo-shaqeyayaashu waxaa khuseeyo ciqaabaha rayidka ee loogu tallogalay u hogaansanaan la’aanta sharciga.

S: Miyuu loo-shaqeeyuhu shaqada ka joojin karaa shaqaalaha diido inuu u hoggaansamo sharciga?

Loo-shaqeeyayaashu waa inay raacaan habraacyadooda shaqaale ee hadda jira si loo go'aamiyo arrimaha edbinta shaqaalaha, oo ay ku jiraan go'aannada joojinta.

Waxaa sii dheer, iyada oo loo-shaqeeyayaashu ay guud ahaan edbin karaan ama joojin karaan shaqaalaha diida inuu raaco shuruudaha goobta shaqada, loo-shaqeeyayaashu waa inay hubiyaan in tallaabo kasta oo edbin ama joojin ah aysan ku socon sharciga ka-hortagga takoorka. Loo-shaqeeyayaasha waxaa laga yaabaa in looga baahdo inay si macquul ah u dejiyaan shaqsiyaadka aan awoodin inay u hoggaansamaan sharciga sababo caafimaad ama rumaysnaan diimeed oo si dhab ah loo haysto, haddii aysan hoygu u abuurin loo -shaqeeyaha dhibaato aan loo baahnayn ama hanjabaad toos ah shaqaalaha ama dadka kale.

Sidoo kale, loo-shaqeeyuhu ma edbin karo ama joojin karo shaqaale ka cawda falalka uu shaqaaluhu aaminsan yahay inay ku xadgudbayaan sharciyada maxalliga, gobolka, ama federaalka. Inkasta oo loo-shaqeeyuhu awoodi karo inuu anshax mariyo ama joojiyo shaqaale diida inuu u hoggaansamo sharcigan, loo -shaqeeyaha ma edbin karo ama joojin karo shaqaalaha si uu su’aal uga keeno sharcinimada sharciga.

S: Ka ahaan shaqaaleeysiiyaha bixiyeyaasha daryeelka caafimaadka iyo shaqaalaha daryeelka caafimaadka ahaan, haddii shaqaalaha aan tallaalneyn oo aan haysan wax dukumiinti ka-dhaafitaan ah aan loo oggolaan gudaha ama goob daryeel caafimaad sidaas darteedna aysan si toos ah ama dadban ula falgelin bukaannada ama walxaha faafa, ma inaan joojiyaa shaqadooda si aan

ugu hoggaansamo shuruudda tallaalka ee bixiyaha daryeelka caafimaadka/shaqaalaha daryeelka caafimaadka ee OHA?

Shaqaalaysiiyaha bixiyeyaasha daryeelka caafimaadka iyo shaqaalaha daryeelka caafimaadka uma baahna inay shaqada ka joojiyaan bixiyeyaasha daryeelka caafimaadka ama shaqaalaha daryeelka caafimaadka ee aan tallaalneyn iyadoo aysan jirin ka-dhaafitaano la ansixiyay haddii batroonigu beddelkeeda doorto inuu siiyo bixiyeyaashaas ama shaqaalaha fasax ama si kale uga mamnuuco inay shaqeeyaan, wax bartaan, wax darsaan, caawiyaan, indha-indheeyaan ama ka tabarucaan goobta daryeelka caafimaadka waqti kasta.

S: Shaqaalaha miyaa laga rabaa inay is tallaalaan inta lagu jiro saacadaha shaqada ee caadiga ah? Haddii ay tahay in la tallaalo wax ka baxsan saacadaha shaqada, loo shaqeeyayaasha miyaa laga rabaa inay lacagta bixiyaan waqtiga shaqaalaha?

Maya, sharciga uma baahna in shaqaalaha la daboolay ay qaataan tallaalka saacadaha shaqada ee caadiga ah, in kasta oo loo -shaqeeyuhu bixin karo ama u baahan karo shaqaalaha in la tallaalo inta lagu jiro maalinta shaqada. Marka laga hadlayo in waqtiga tallaalku yahay mid la magdhowi karo iyo in kale, Xafiiska Shaqada iyo Warshadaha ee Oregon wuxuu leeyahay Su'aalo Inta Badan La Isweydiiyo (FAQ) oo ka hadlaya mawduucan, laga heli karo https://www.oregon.gov/boli/workers/Pages/covid-vaccine.aspx. Ugu dambayntii, shuruudo dheeraad ah ayaa laga yaabaa in lagu dabaqo loo-shaqeeyayaasha ku khasban heshiisyada gorgortanka wadajirka ah ama qandaraasyada shaqada.

S: Miyeey loo-shaqeeyayaasha ama shaqaalaha leh gelitaanka diiwaanka tallaalka Maamulka Caafimaadka Oregon (OHA) (ALERT IIS) xaqiijin karaa heerka tallaalka shaqaalaha ama is-xilqaamayaasha si toos ah gudaha ALERT IIS?

Maya. Sharciga Oregon uma ogolaado loo-shaqeeyaha ah isticmaalaha la ansixiyay ALERT IIS ee lagu isticmaalayo nidaamka si lagu eego warbixinta tallaalka COVID-19 ee shaqaalaha ama istaafka. Gelitaanka ALERT IIS oo ujeedkaan wuxuu ku xadgudbkaa heshiiska isticmaalaha.

S: Miyay shaqaalaha xarumaha Adeega Dhaqancelinta Dabeecada (BRS) ee loogu tallagalay dhallinyarada aanan maalgelin DHS sida waafaqsan sharcigaan?

Haa.

S: Miyuu sharciga tallaalka bixiyaha daryeelka caafimaadka khuseeyaa shaqaalaha ka shaqeeyo dukaamada leh farmashiyada laakiin aan ahayn shaqaalaha farmashiga?

Maya. Sharciga ma khuseeyo shaqaalaha (kuwa raseeyo badeecada, ka shaqeeyo diiwaaniyaha kaashka, iwm.) ee dukaamada tafaariiqda iyo farmashiyada aanan loo tixgelin shaqaalaha farmashiga.

S: Miyuu sharciga tallaalida bixiyaha daryeelka caafimaadka khuseeyaa mutadawiciinta banaanka ka jawaaba ee ugu horeeya, sida roondada caafimaadka iyo, baaritaanka iyo taqasuska badbaadiyayaasha?

Haa, haddii jawaabayaasha koowaad ay yihiin bixiyayaasha adeegyada caafimaadka degdega shatiyeysan.

S: Miyuu loo-shaqeeyuhu mas'uul ka yahay hubinta tallaalka iyo in dukumiintiyada ka-dhaafitaanka ay sax yihiin?

Loo-shaqeeyaha loogama baahna inuu qaado tallaabooyin dheeraad ah si uu u xaqiijiyo in dukumiintiyada xaaladda tallaalka ay sax yihiin. Loo-shaqeeyaha waa inuu la tashadaa la-taliyahiisa sharciyeed haddii uu rabo inuu qaado tallaabooyin lagu hubinayo in dokumiintiyadu ay sax yihiin.

S: Haddii diiwaanka tallaalka ee shaqaaluhu muujiyo garoojada tallaalka koowaad ee Moderna iyo tallaalka labaad ee Pfizer, shaqaalaha ma loo tixgeliyaa mid si buuxda u tallaalan 14 maalmood kadib garoojada labaad ee tallaalka?

Haa.

S: Waa maxay farqiga u dhexeeya “ka-reebitaan” iyo “ka-dhaafitaan” sharciga tallaalka?

ADA iyo sharciyada ilaalinta naafada gobolka ee la xiriirta iyo sidoo kale sharciyada gobolka iyo federaalka ee khuseeya hoy diimeedyada ayaa suuragelin kara in laga reebo xeerarka shaqada iyada oo la adeegsanaayo hanaanka hoyga macquul ah. Sida ku cad OAR 333-019-1010, haddii ka reebitaan ku aadan ansixinta tallaalka lagu bixiyey xaalad gaar ah, waxaa jiri doona tallaabooyin kale oo la hirgalin doono taas oo qeyb ka ah hanaanka hoyga macquulka ah si loogu xadido gudbinta COVID-19. Sida waafaqsan, ka-reebitaanada diimeed iyo kuwa caafimaadkaba uma shaqayn doonaan si ***looga dhaafo*** bixiyeyaasha daryeelka caafimaadka iyo shaqaalaha ka tirsan goobaha caafimaadka ee xeerka tallaalka, laakiin taa badelkeeda waxay noqon doontaa meel laga bilaabo hannaanka isdhexgalka si loo go'aamiyo in haddii ka-reebitaan lagu bixin karo tallaabooyin kale oo badbaado ah badelkeeda.

S: Dokumintiyadee/cadeyntee ayaa looga baahanyahay ka dhafida diimeedka ama caafimaadka?

Wixii ka-dhaafitaanka diimeed ah, shaqsigu waa inuu buuxiyaa oo saxiixaa Foomka Codsiga Ka-dhaafitaanka Diimeed ee COVID-19. Codsiga ka-dhaafitaanka waa inuu ku salaysnaado aaminaad diimeed oo si dhab ah loo haysto waana inuu ku jiraa bayaan qeexaya sida shuruudda tallaalka uga hor imanayo dhawrista diimeed, ku dhaqanka, ama waxa uu aaminsan yahay shaqsiga.

Wixii ka-dhaafitaanka caafimaad ah, shaqsiga iyo daryeel bixiyihiisa caafimaadka waa inay buuxiyaan oo ay saxiixaan Foomka Codsiga Ka-dhaafitaanka Caafimaad ee COVID-19. Bixiyaha daryeelka caafimaadka waa inuu caddeeyaa in shaqsigu qabo curyaannimo jireed ama maskaxeed taas oo xaddideyso awoodda shaqsiyeed uu ku qaato tallaalka COVID-19 sida ku saleysan baaritaanka caafimaadka la qeexay, waana inuu qeexdo in curyaannimadu ay si ku meelgaar ah ama joogto ah dabiici u tahay.

Foomam isku mid ah ayaa la isticmaali karaa, badelkii foomamka OHA, laakin foomamka waa inay wataan dhammaantood isla warbixinta looga baahanyahay foomamka OHA. Shaqsiyaadka waa inay la hubiyaan badrooniyadooda si ay u go'aansadaan haddii ay jiraan isla foomka la isticmaali karo.

S: Halkee ayaan ka heli karaa foomka aan u baahanahay inaan buuxiyo si aan u codsado ka-reebitaan caafimaad ama diimeed ee shuruudda tallaalka?

Shakhsiyaadka waxay ka heli karaan foomamka xiriiriyeyaasha soo socda:

Foomka Codsiga Ka-dhaafitaanka Caafimaadka ee Tallaalka COVID-19

Foomka Codsiga Ka-dhaafitaanka Diimeed ee Tallaalka COVID-19

S: Waa maxay xaaladaha caafimaad ee qof looga dhaafi kara tallaalka?

Ka reebitaanada caafimaadka ayaa ah iqtiyaarka bixiyaha caafimaadka. Fiiri liiska CDC kahortaga tallaalka.

S: Haddii shaqaalaha diido inuu buuxiyo foomka ka dhaafida OHA oo taa beddelkeedana kaliya iimaylo u diro loo-shaqeeyaha, miyaa xeerka lagu xadgudbay? Miyuu loo-shaqeeyuhu dhameystiri karaa foomka ka dhaafida oo ay la jiraan warbixinta lagu soo diray iimayl ahaan?

Shaqsiyaadka ka raadinayo ka dhaafida shuruudda tallaalka COVID-19 ayaa looga baahanyahay inay buuxiyaan oo ay u gudbiyaan badroonigooda codsiga ka dhaafida iyada oo la isticmaalayo foomka codsiga ka dhaafida Maamulka caafimaadka Oregon (OHA) u qoray, ama foomka la midka ah ee wataa isla warbixinta looga baahanyahay isla foomka OHA. Waa suurtogal in badrooniga uu yeelanayo tallaabooyin dheeraad ah oo lagu codsanayo ka dhaafida ama tallaabooyinka dheeraadka ah loo baahanyahay sida la xiriirta ka dhaafida.

S: Ma inay shaqaalaha isticmaalaan foomamka ka reebida OHA, ama miyey ogolaan karaan noocyada kale ee dokumintiga? (tusaale ahaan, qoraalka dhaqtarka, imaylka sheegayo ka reebid diimeedka)?

Sida ku cad OAR 333-019-1010, shaqsiga waa inuu raadisadaa ka-dhaafitaan isagoo isticmaalayo foomka ay qeexeen Maamulka caafimaadka Oregon, ama foomka la midka ah ee ka kooban isla warbixinta looga baahanyahay foomka OHA.

S: Dokumintigee ayaa looga baahanyahay ka dhaafida aaminaada diimeedka sida daacada loo haysto?

Ma jiraan xaqiijin gaar ah oo dokumintiga ee looga baahanyahay codsiga ka dhaafida aaminaada diimeedka sida daacada ah loo qabto. Si kastaba ha noqotee, shaqsiyaadka ayaa looga baahanyahay inay siiyaan dhammaan warbixinta lagu weydiiyay foomka, oo ay ku jiraan aqoonsiga aaminaada diimeedka sida daacada ah loo haysto ee ka celisaa iyaga qaadista tallaalka COVID-19 iyo sida aaminaadaas ay u saameyso awoodooda lagu qaadanayo tallaalka. Wixii wadahadal aad u sharraxan ah ee ku saabsan weydiimaha badrooniga su'aalaha diimeed ama ka daacadnimada waxa uu aaminsan yahay shaqaalaha, ka fiiri 12-I-A barta:

https://www.eeoc.gov/laws/guidance/section-12-religious-discrimination#h_255006745363916107498678 44.

S: Ka ahaan daryeel bixiye caafimaad, ma saxiixi karaa foomkayga codsiga ka-dhaafitaanka caafimaadka?

Maya. Ka-dhaafitaanka caafimaad waa in lagu xaqiijiyaa dukumenti uu saxiixay bixiye caafimaad oo aan ahayn shaqsiga doonaya ka-dhaafitaanka.

S: Waa nidaam dhaxgal ee loo-shaqeeyaha ama qof kaloo masuul ah ee looga baahanyahay shaqsiyaadka codsadaan ka dhaafida diimeedka ee ku saleysan aaminaada diimeedka daacadnimada u haystaan?

Haa, badrooniga ayaa guud ahaan ku waajib ah ka qeybgelinta nidaamka isdhaxgalka ee sahminayo hoyga (hoyada) macquulka ah. Nidaamkan waa muhiim sababtoo ah xammilida kuma xaddidno waxa laga yaabo in shaqaalaha laga codsado oo warbixin dheeraad ah ayaa loo baahan karaa si loo go'aansado haddii xammilidu saarayso dhibaato aan loo baahneyn badrooniga ama haddii shaqaaluhu uu u keenayo halis toos ah goobta shaqada (xitaa kadib tallaabooyinka kale ee badqabka ee la fuliyay).

S: Waxaan codsanayaa ka-dhaafitaanka shuruudda tallaalka. Xageen ku soo gudbiyaa foomkayga codsiga ka-dhaafitaanka?

Shaqaalaha, qandaraasleyaasha iyo mutadawiciinta waa inay u soo gudbiyaan foomamkooda codsiga ka-dhaafitaanka batrooniyadooda kadib habraacyada uu dejiyey loo-shaqeeyahooda. Tilmaamaha guud ee buuxinta foomamka waxaa laga heli karaa halkan. HA U gudbin foomamka codsiga ka-dhaafitaanka Maamulka Caafimaadka Oregon.

S: Si buuxda ayaan u tallaalanahay. Xageen ku soo gudbiyaa caddeynta tallaalkayga si aan ugu hoggaansamo sharciga?

Shaqaalaha, qandaraasleyaasha iyo mutadawiciinta waa inay u soo gudbiyaan caddeynta tallaalkooda loo-shaqeeyahooda iyadoo la raacayo habraacyada uu dejiyay loo-shaqeeyahooda. HA U soo gudbin caddeynta tallaalka Maamulka Caafimaadka Oregon.

S: Waxaan ahay iskiis u shaqeyste. Xageen ku soo gudbiyaa caddaynta tallaalka ama foomka codsiga ka-dhaafitaanka?

Shakhsiyaadka iskood u shaqeysta waa inay hayaan diiwaankooda caddaynta tallaalka ama foomka codsiga ka-dhaafitaanka sida ku cad sharciga. Sida sharciga ku cad, dukumentiyadu waa:

(a) In loo joogteeyo si waafaqsan sharciyada federaalka iyo gobolka ee lagu dabaqi karo;

(b) In la joogteeyo ugu yaraan labo sanno; iyo

(c) In la siiyo Maamulka Caafimaadka Oregon marka la codsado.

S: Waa maxay tusaalooyinka qaar ee hoyga ama tallaabooyinka badqabka loo-shaqeeyayaashu ku laasimi karaan shaqaalaha aan u suurtogaleynin in la tallaalo sabab la xiriirto xaaladaha caafimaadka ama aaminaadaha diimeedka.

Ka mid ah tallaabooyinka badqabka suurtogalka ah, sida ka qeyb ah siinta ka dhaafida shuruudda tallaalka, shaqaalaha aan tallaalneyn, qandaraaslaha ama tabarucaha soo galayo goobta shaqada ayaa looga baahan karaa inuu xirto maaskarah wajiga N95, ka fogaado jir ahaan dadka kale iyaga oo joogo goobta shaqada, ka shaqeeyo isbadelka la badelay markii ay jiraan dhoor shaqsiyaad ee goobta shaqada, helaan baarotaanada mudeysan ee COVID-19, la siiyaa fursada shaqada qadka, ama ugu dambeyntii, la ogolaado dib uga shaqeynta. Tallaabooyinka badqabka ee loo-shaqeeyuhu soo rogo waxay ku xirnaaneysaa booska waajibaadyada shaqaalaha iyo jawiga shaqada ee ka midka ah arimaha kale. Haddii ay macquulgal tahay, loo-shaqeeyayaasha ayaa laga yaabaa inay tixgeliyaan inay ku siiyaan hoyga qaar si ku meelgaar ku saleysan iyo dib u eegida markale kadib muddada la qeexay. Wixii warbixin dheeraad ah ee ku saabsan xammilida ka fiiri Su'aalaha K.2 iyo K.6 barta: https://www.eeoc.gov/wysk/what-you-should-know-about-covid-19-and-ada-rehabilitation-act-and-other-eeo-laws#D.

S: Miyeey tahay in loo-shaqeeyuhu bixiyo ka dhaafida oo siiyo hoy-yeeynta ama miyuu loo-shaqeeyuhu joojin karaa shaqada qofka codsadaa ka dhaafida?

Sharciyada goobta shaqada ku haboon waxaa ku jiro Title VII, ADA, iyo sharciga gobolka ee u dhigmaa guud ahaan wuxuu uga baahanyahay badrooniga inuu siiyo hoy macquul ah shaqaalaha ee, sababtoo ah curyaannimada ama aaminaada diimeedka sida daacada ah loo haysto, codsiga ka dhaafida ka imaaneyso waajibaadka tallaalka. Ka dib ka qeybgelida nidaamka dhaxgalka, loo-shaqeeyaha ayaa go'aansan karo hoyga dhibaatada aan loo baahneyn ee keento halis toos ah ee goobta shaqada ee aanan lagu yareyn karin heer la ogolaan karo ama lagu baabi'in karin hoy macquul ah. Haddii aan hoy la bixin karin, haddii joojinta ay ku haboontahay go'aanka loo-shaqeeyaha oo ay quseyn karto qodobo heshiisyo gorgortan isku jir ah, meesha ay ku haboontahay, ama xeerarka badrooniga.

S: Waa maxay habka loo soo gudbiyo oo loo ilaaliyo foomamka ka reebitaanka?

Shaqsiyaadka waa inay tixracaan Tilmaamaha lagu buuxinaayo foomka Codsiga Ka-dhaafitaanka Caafimaad ee COVID-19 iyo Foomka Codsiga Ka-dhaafitaanka Diimeed ee COVID-19 si ay u fahmaan halka loo soo gudbinayo foomamka ka-dhaafitaanka. Foomamka ka reebitaanka waa in la buuxiyaa oo loo gudbiyaa shaqaaleeyaha shakhsiga ama qof kale oo mas'uul ah. HA U dirin foomamkaan Maamulka Caafimaadka Oregon. Loo shaqeeyaha shaqsiga ama qofka kale ee mas'uulka ah waxaa looga baahan yahay inuu hayo dokumiintiga ugu yaraan laba sano oo uu siiyo Maamulka Caafimaadka Oregon marka laga codsado.

S: Miyuu loo-shaqeeyuhu aasaasaa xeerar aad uga xadidan sharciga, tusaale ahaan, u baahan baaritaanka isbuuclaha oo shaqaalaha aan tallaalneyn, u baahan tallaalida shaqaalaha fog, dhaqan geliyo qorshaha qarash wadaagida caafimaadka kordhay ee loogu tallogalay shaqaalaha aan tallaalneyn?

Haa. Sida la xiriirto codsiga ka dhaafidaada, wuxuu kugu laasimi karaa badroonigaaga ama dhinaca kale ee masuulka ah inaad qaadid tallaabooyin dheeraad ah ee looga illaalinayo adiga iyo dadka kale inuu ku dhaco ama faafiyaan COVID-19, oo ay ku jiri karto xeerar dheeraad ah. Goobaha shaqada loogama baahna inay bixiyaan ka dhaafida hoyga haddii sameynta sidaas ay u keeneyso halis toos ah shaqsiga la ogolaaday ama dadka kale ee goobta shaqada ku sugan ama ay ku abuuri karto dhibaato aan loo baahneyn.

S: Miyuu bixiye daryeel caafimaad midkuu doono ha ahaadee saxiixi karaa foomka ka-dhaafida caafimaad ee tallaalka loo baahan yahay ee ku jira sharciga Maamulka Caafimaadka Oregon?

Xirfadle kasta oo katirsan daryeelka caafimaadka ama baxnaaninta oo habboon ayaa saxiixi kara foomka ka-dhaafida caafimaad, inkastoo macluumaadka ku jira foomka ay tahay inuu ka baxsaneyn baaxadda shatiga, diiwaangelinta ama sharciyeynta bixiyaha caafimaadka.

S: Miyey tahay sharci daro in loo-shaqeeye loo soo gudbiyo tallaal been ah ama dukumentiyo ka-reebitaan oo been ah?

Maamulka Caafimaadka Oregon (OHA) wuxuu qaatay xeerar fulinaya sharciyada ORS 431.110(7) iyo ORS 433.004(1)(d) oo ah sharciyo OHA siinaya awood ay ku xakameeynayaan cudurada sida fudud ku faafa sida COVID-19. Xeerarka OHA waxay ka doonayaan bixiyeyaasha daryeelka caafimaadka, shaqaalaha dugsiga iyo kuwa barnaamijka ku saleysan dugsiga inay loo-shaqeeyahooga ama dadka kale ee mas'uulka ka ah usoo gudbiyaan dukumentiyada tallaalka ama codsiga ku saabsan ka-reebitaan caafimaad ama mid diimeed. Kuxadgudbida xeerarka OHA waa fal-dambiyeed ah Heerka A sida ku cad ORS 431.990 iyo ORS 433.990. OHA haddii ay helaan cadeymo tusinaaya in qof soo gudbiyey macluumaad been ah si uu ugu muuqdo mid u hogaansan xeerarkooda tallaalka, OHA waxay arrinta u gudbin karaan hay'adaha sharciga ee deegaanka ama kuwa gobolka si loo baaro. Fal-dambiyeedka Heerka A waxaa lagu ciqaabi karaa xabsi dhan 364 maalmood iyo ganaax la eg $6,250.

Helitaanka dukumiintiga: Shakhsiyaadka naafada ah ama shakhsiyaadka ku hadla luuqad aan ka aheyn Ingiriis, OHA waxay ku bixin kartaa warbixinta qaabab kale oo dadban sida fasiraadaha, daabicida farta waaweyn, ama farta indhoolayaasha. Kala xiriir Xarunta Macluumaadka Caafimaadka 1-971-673-2411, 711 TTY ama COVID19.LanguageAccess@dhsoha.state.or.us.